Daryeel Bixiyaha Qaaliga Ahow,

Taariikhda kama dambeyska ah ee tabbabarka xirfadaha cusub ee uu gobalku faro ayaa soo dhaw.

Waa inaad bogtaa dhammaan 12.5-ka saacadood ee tabbabarkaaga ah marki la gaadho ama ka hor Juun 30, 2022. Haddii aadan bogin marki la gaadho ama ka hor taariikhda kama dambeyska ah, wuxuu gobalka kuu soo diri doonaa ogaysiis shaqo joojin.

Fadlan gal **carewellseiu503.org/so/training/current-workers/** ama iskaan garee koodhka hoose si aad iskuugu diiwaangeliso ama dib ugu gasho tabbabarkaaga.

Fadlan ha ahaado qorshahaaga inaad bogto ka hor taariikhda kama dambeyska ah si aad u sii wado inaad daryeel siiso macmiilkaaga. Waxaa jira qaabab badan oo kaa caawin kara inaad tabbabarkaaga waafajiso jadwalkaaga:

- Waxaad qaadan kartaa cashiro uu qofka isa siiyo oo Tabbabarka Xirfadaha Cusub ee Onleenka ah wakhti walbo oo adiga kugu habboon. Waxaad joojin kartaa oo aad dib u bilaabi kartaa inta jeer ee aad doonto. Daryeel bixiyeyaasha qaarkood waxay ku bogaan gebi ahaanba hal fadhi. Kuwa kale waxay sameeyaan hal saac maalinki.
- Carewell waxay bixisaa kulamada Aqoon Isweydaarsiga Xirfadaha Cusub toddobaadka oo dhan, oo ay ku jiraan habeenada iyo maalmaha toddobaad dhamaadka. Qabso kulan ku habboon jadwalkaaga.

Haddii aad u baahan tahay taageero sida inaad ku hesho tabbabarka luuqad kale ama qaab kale, fadlan kala xiriir Carewell wicitaanka taleefonka ee lambarka 1-844-503-7348 (Isniin-Jimce 8am-6pm) ama iimayl ugu dir CarewellSEIU503training@RISEpartnership.com.

Haddii aadan bogin tabbabarkaaga marki la gaadho ama ka hor Juun 30, 2022, oo aad warqada shaqo joojinta ka hesho gobalka, waxaad fursad u yeelan doontaa inaad racfaan ka qaadato go'aanka haddii aad sidaas go'aansato. Haddii aad bogto dhammaan tabbabarka inta lagu jiro muddada rafcaanka ee lagu sheegay ogaysiiska shaqo joojinta, markaas lagaama joojin doono shaqada.

Shaqada aad qabato si aad daryeel u bixiso aad ayay muhiim u tahay, iyo inaad xaqiijiso in qof walbo uu helo daryeelka uu u baahan yahay waxay muhiim u tahay bulshadeena. Waad ku mahadsan tahay inaad ku bogtay shuruudaha tabbabarkaaga wakhtiga saxda si aad u sii wado inaad bixiso daryeelka lagama maarmaanka ah.

525 NE Oregon Street, Portland, OR 97232 • Taleefon 1-844-503-7348 • carewellseiu503training@RISEpartnership.com • CarewellSEIU503.org

Carewell SEIU 503 waa qoyska tabbabarka iyo dheefaha ay sida adag u hanteen shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed ee SEIU 503 si ay u hormariyaan noolashooda. Iyada oo lagu bixinayo qaab cad, fudud oo lagu kalsoonaan karo, dheefahan waxay siiyaan xasiloonida, caafimaadka, xirfadaha iyo tabbabarka shaqaalaha ay u qalmaan,

Dhammaan dheefaha waxaa bixiyo RISE Partnership, adeeg taageera dheefta oo ku saleysan shaqaalaha.